## Guulaha iyo caqabadaha wasaaradda Waxbarashada maamulka SSC Khaatumo

WQ: Khaliif Dalmar

Jidbaale.net



*Figure 1: Juun 28, 2024, Dabaal-dagga ardayda falsalka 12aad maalinta ugu danbaysay imtixaanka Qaran, Magaalada laascaanod, SSCKH-Soomaaliya*

## 1. Hordhac:

Qaraalkan waxaan ku fiirin doonaa arrimaha waxbarashada maamulka **SSC Khaatumo,** annagoo dul-istaagi doonna guulaha ay gaadhay iyo caqabadaha haysta wasaaradda Waxbarashada maamulka **SSC Khaatumo**. 15 kii sano ee ugu danbaysay deegaanka waxaa ka jiray dhibaatooyin badan gaar ahaan dhanka waxbarashada, waxaana ka mid ahaa manhajka iyo hannaanka waxbarashada oo salka ku hayay maamulka gooni-goosadka ee deegaanka badankiisa maamulayey gaar ahaan caasimada Gobolka Sool ee Laascaanod. Maamulka goonni-goosadka (Soomaaliland) rabitaanka shacabka deegaanka kuma joogin ee wuxuu ku joogay xoog iyo xeelad. Dagaalkii ay xoogga ku qabsatay sannadkii 2007 kii, waxaa ku waxbarasho beelay arday badan waxaana xidhmay iskuulo iyo goobo waxbarasho. Waxaa deegaanka ka tagay bareyaal sare iyo macallimiiin oo aan deegaanka ku soo laaban, waxaa ka guuray reero badan oo deegannada kale u wareegay ama dalalka dariskaa oo aan wali soo noqon. Dhammaan arrimahani waxay ku keeneen ardaydii saamayn taban arrimaha waxbarashada, waayo dadku kuma qanacsanayn manhajka iyo xukunka maamulka goonni-goosadka (Soomaaliland).

6 dii bishii Febaraayo, 2023 kii maamulka Soomaaliland wuxuu dagaal kusoo qaadey shacabka Laascaanod iyo **SSC Khaatumo** guud ahaan, dagaalkaasi wuxuu saamayn taban ku yeeshay bahdii

waxbarashada, waxaa la xidhay 345 oo goob waxbarasho ah oo isugu jira Iskuullo, Madarisado, Jaamacado, xarumaha farsamada gacanta, isagoo saameeyey in ku dhow 54,000 oo arday, ku dhowad 3,000 oo macallin iyo guud ahaanba goobihii waxbarashada oo meesha ka baxay isuna bedelay goobo dadka dhaawaca lagula tacaalo iyo goobo ciidamo fadhiisamo ka dhigtaan taasoo khasaare baaxad weyn ku keentay guud ahaan ba waxbarashadii gobolka.

Dhibka ugu weyn wuxuu gaarey ardaydii waxbaranaysay oo qeybna dagaalka gashay, qaarna qaxeen oo waayeen fursadihii tacliinta, qaybtii askarowdey wali waxay kujiraan goobaha difaaca waxaaana adag in ay dib ugu noqdaan waxbarashadii iyo noloshii caadiga ahayd.

Tan iyo markii la dhisay xukumaddii ugu horraysay ee maamulka **SSC Khaatumo**, Bishii Sep 25, 2023 kii, waxay dadaal nafhurnimo ah ku bixiyeen arrimaha waxbarashada. Xoghayaha wasaaradda ayaa hoggaamiye Cadbiqaadir Axmed Aw Cali 'Firdhiye' u magacaabay mudane Cabdixakiin Jaamac Dalmar. Waa wasiirka Waxbarashada ugu horreeyey ee maamulka **SSC Khaatumo** ee Laascaanod laga yagleelay bishii Agoosto 5, 2023 kii.

Maqaalkan waxaan ku dul istaagi doonaa waxa u qabsoomay wasaaradda Waxbarashada maamulka **SSC Khaatumo** iyo caqabadaha soo wajahay intii ay shaqeyneysey.

## 2. **Guulaha wasaaraddu gaartay:**

Culaysyada jiray ee lahaa mid amni, dhaqaale, bulsho dagaal naafeeyey, iyo mid siyaasi ahba, waxaa adkayd meel wax laga bilaabo. Wakhtigii maamulka SSC Khaatumo uu deegaanka gacanta ku dhigay iyo waxaa isku soo aaday sannad dugsiyeedka imtixaamaadka dugsiga sare, hoose iyo dhexe.

1. Waxaana ahmiyadda 1-aad noqotay si ardayga sannad ugu harin waxbarashada sannad dugsiyeedka 2023/2024 in ay helaan manhaj, waayo nidaamka gooni-goosadka (Soomaliland) ee hannaanka waxbarashada degmooyinka intooda badan ka jiray laguma qanacsanayn manhajkiisa, waxayna ahayd waxyaalihii laga dagaallamay.

2. Si manhaj midaysan loo helo ardaydana loogu diyaariyo inay galaan imtixaanka sannad dugsiyeedka, waxaa Wasaaradu fulisey manhajka waxbarashada Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya (JFS). Waxaa tababarro loo qabtay macallimiinta, iyo maamulayaasha, iyo korjoogayaasha imtixaamaadka, Wasaaraddu waxay iibsatay Machiinka sameeya kaadhka ardayga iyo diwaangalinta waana waxa waxbadan ka caawiyey in xogta ardayda imtixaanka galaysa fududaysay in qofkasta ID iyo numberka imtixaanka si fudud lagusiiyey.

3. Goobaha waxbarashada oo ahaa kuwa gaarka loo leeyahay tan iyo burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya markay meesha ka baxday, ayaa la mamulku faray in dib loo furo gaar ahaan meelihii xidhnaa sida Laascaanod. Wasaaradda iyo howl-wadeenadeeda ku shaqaynaya naf-hurnimo iyo iskutashi bulsho waxay xoogga saareen inay diwaan galiso ardayda dhammaynasa dugsiyada sare, dhexe iyo hoose. Waxaana Wasaraddu ku guulaystay hannaan isku xidhin ee dhijitaalka (Education information management system) ee maamul goboleedada dalku ku jiraan lagu daro.

4. Imtixaamaadku wuxuu ahaaa labo heer, mid waa dugsiga sare (fasalka 12-aad) oo ay dajintiisa iyo qaadistiisa leedahay wasaaradda Waxbashada JFS, kan kalena waa dugsiga hoose iyo dhexe (fasalada 4-aad iyo 8-aad) ay qaaddey wasaarada Waxbarashada SSC Khaatumo, waxaana soo horreeyey kan falska 12-aad (form 4) bishii Juun, 22, 2024 kii, waxaan magaalada

Laascanood iyo Buuhodle laga dahfuray imtixamka Qaran oo mudo ka badan 33 sano laga galin. Imtixaanka iyo macallimiinta qaaday ayaa lagu keenay diyaarada ka soo qaaday Xamar, waxaana magalada laascaanod ka daahfuray Hogaamiyaha mamulka SSC Khaatumo, Cabdulqadi Axmed Awcali (Firdhiye). Imtixaan ayaa fadhiistay arday dhan 1,154 (wiilal iyo gabadho isku jira). Wasiirka/xoghaya waxbarashaa **Cabdixakiin Jaamac Dalmar** ayaa maalintii imtixaanku dhamaaday 28 July yiri: *"Waxaa lasoo maray maaalmo badan oo adag oo fulaygu shakiyey. Dad badani ayaa na shaki galiyey, oo lahaa waxba ma qaban kartaan, hawlahanna kuma guulaysan kartaan. Dad badan oo magac iyo maamus ba leh ayaa aamini wayey inaan shaqdan qaban karno, Alle ayaase nagu guuleeyey"*[1]. waxay ahayd farriin dareen ruuxiya, samir iyo dhiiran muujinasa qofki fahansanna xaalada markaa jirtay ee aan kor ku soo xusnay.

5. Bishii Luulyo 6, 2024 kii, imtixaanka Shahaadigaa ee fasallada 8-aad ayaa wasaaradda Waxbashadu daahfurtay waxaana u fadhiistay arday gaaraysa 2,505[2] oo arday kuna galaya 16 goobood. maamulka SSC Khaatumo iyo shacabkiisa ayaa iska kaashaday shaqadan oo wax caawimaad ah bannaanka kama helin. Waxaa xusid mudan in wasaaraddu ku guulaysan in ardayda reer SSC Khaatumo ee magalada Ceerigaabo aysan galin imtixaanka Qaran ee dugsiga sare iyo kan maamulka SSC Khaatumo duruufo jira owgeed. Taas oo cadadka ardayda imtixaanka gashay hoos u dhigasa.

6. In caddad intaa leeg imtixaanka u fariisto waxaa sababay dagaalka Sool, iyo in waalid iyo arday badan cabsi ka qabeen in maamulka SSC Khaatumo oo xaalada adag ku sugnaa ay seegaan imtixaanka sannad dugsiyeedka, ku waas oo galay imtiaxaanka goobihi ay u barakaceen sida Maamulka Punland. Haddana arrintani waa mid guud oo Soomaaliyoo dhan ka jirta. Wasiirka waxbarshada DFS Mudane Farax Cabdulqadir, mar uu ka hadlayey arday guud ee Soomaaliya u fadhiistay imtixaanaadka dugsiga sare sannadka 2024ka, wuxuu sheegay in 20% ay ka yihiin ardayda waxbarashada fursad u heshay marka la fiiriyo ardayda gaadhay heerka waxbarashada! taas macneheedu yahay inay aysan helin fursad waxbarasho 80%! waxaa galay imtixaanka 60k wax gaaraya laakin waxay ahayd inay galaan 300k iyo ka badan! Kenya oo dariska Soomaaliya ah waxa imtixaanka dugsiyada sare u fadhiistay wax ka badan 1.4 malyan oo arday ah.

7. Agaasimaha waxbarashada SSC Khaatumo Farduus Ibraahim, 16 kii bishii Nofeembar, 2024 kii, mar aalada Twitter (X space) ay waraysi ku bixisay, waxay sheegtay: *"in ardayda shahaadada oo tasdiiqsan loogu keenayo magalada Laascaanod markay dalbadaan iyagoon wax dhibaato ah kala kulmin"*. Hawl wadeennada Wasaaradda ayaa iyaguna sheegay: *"in 10 arday ee ugu horreeyey ee dalbaday shahaada dugsiga sare ee imtixaanka Qaranka galay ay heleen 10 kii bishii May, 2024 kii, waa guul weyn in ardaygu si fudud ku heli karo shahaadada isagoo jooga gurigiisa".*

8. Wasaaraddu waxay dadaal dheeri ah ku bixisey in xaqa iyo xuquuda waxbarashada magaca Soomaaliyeed lagu soo qaato ay deegaanka soo gaaran. Wasiir Cabdixakiin iyo howl wadeennada wasaaradu sida agaasimaha guud Farduus Cali Shire ayaa safarro Muqdisho ku tagay, dadaal dheeri ah kadib, waxaa lagu guulaystay ina laga qayb galiyo marshuuca tayeynta waxbarashada oo ah bixinta mushahaaraadka macallimiinta. Marshuucaas waxay ka heleen macallimiin dhan 200 boqol oo macallin ee dugsiyada hoose iyo sare marshuucan oo miisinayada DFS ku jira. Dabcan maahan xaq laakiin waa bilow fiican, waxay kaloo 10-ka kaalmood ee ugu

[1] Farinta ayuu wasiirku soo dhigay dagalka uu ku leeyahay Barta facebook

[2] Wasaradda Waxbarashad SSC Khatumo

sareeya Deegaanka SSC Khatumo imtixaanka Fasalka 12aad ku guulaysteen deeq waxbarasho (Scholarship) ay dalka Masar siisay Dawlada Soomaaliya[3].

9. Wasaaraddu waxay ku guulaystay inay dayactir ku samayso dhowr iskuul iyado bulshada usoo gudbinasa baahiya jira. Goobahaas waxaa ka mida iskuulka Tukaraq, Fiqifulye oo agaasime Farduus Cali Shire usoo gudbisay baahiya jidha bulshada SSC Khaatumo. Sidaasna lagu dayac tiray. waxaa qalabayn iyo agabka tamarta dhaliya oo hadda socda lagu samaynayaa 23 xarumood oo Waxbarsho, iyo Wasaradda dhexe ee waxbarashada waxaana fulintiisa gacan ka gaysnaya marshuucan Wasaradda Wasaarada Tamarta iyo Biyaha DFS iyo hay'ad maxalliya.

10. Wasaaraddu waxay ku guulaystay in marshuuc waxbarashada "Global partship education project" lagu daro iyadoo markii hore laga reebay, marshuucana ayaa qaybta SSC Khaatumo soo gaartay dhantahay 3,000,000 doolarka maraykan ah, waxaana iska kaashanaya wasaarada Waxbarashada iyo Hay'adda Alight International. Mashruucan ayaa u badan dayactir goobaha waxbarashada iyo tayeynta macallimiinta dugsiyada hoose (Primary schools).

## 3. Cagabadaha haysta wasaaradda:

Caqabadaha ugu waaweyn ee wasaaradda iyo maamulka guud ahaan haysta waxaa ka mida:

1. Miisaaniyad iyo qorsha la'aan: Waxkasta marka la rabo in guulo laga gaaro waa in qorshe iyo miisaaniyad lahelaa, waana caqabada ugu weyn ee Wasaaradda iyo hawl wadeenadiisa haysta, waayo marjirto dhaqaale ku filan oo maamulka soo gala. Tani Maamulka SSC Khaatumi kaliya kuma koobna ee waa dhammaan nidaamyada maamul ee dalka ka jira, mid heer Qaran ama heer gobooleedba. Arrinka maaliyada ayaa waxaa ku xidhan arrimo badan oo wax kala fududayn kara sida shaqaalaha oo shaqadooda si caadiya uguta iyo hirgalinta qorshayaasha dagsan iyo sharciyada.
2. Khibrad yari maamul iyo xirfada shaqaalaha wasaaradda ee howlaha maalin lahaa: Maamulka oo wali curdin ah iyo burburka dhaqaale, siyaasadeed ayaa iyana saamayn weyn kuleh arrimaha waxbarashada deegaanka.
3. La jaanqaadida isbed-bedalka iyo horumarinta ku socda arrimaha waxbarashada ee heer Qaran: Maadama maamul dhis iyo maamul daadajin uu ku socdo arrimaha waxbarashada sida manaahijta, yayeynta xeerarka iyo awoodaha heerarka kala duwan, maalgalinta iyo jaangoynta xilli sanadeedka waxbarashada, ayaa ah kuwa ay adagtahay in maamulka marba la jaanqaado ama hirgaliyo.
4. Dabacsanaan iyo awood yari fulinta go'aamada ee Qaran ee arrimaha waxbarashada: Tusaale, Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta sare ee Federaalka ayaa sannadkii 2019 kii soo saartay go'aan muddo shan sano looga dhigayo waxbarasha heerka 1-aad ee Jaamacadaha (Bachelor's Degree) fiiri figure 2 (Ogaysiis). Go'anka loo dhaqan galiyo Wasaaraddu waxay 17 kii bisha Agoosto, 2023 kii, soo saarty in heerka waxbarashad sare lagu kordhiyey sannadka aasaasigaa (Foundation Year), Fiiri figure 3, go'aanka ayaa ka dhigaya heerka 1-aad ee Jaamacadaha Dalka muddo shan sano ah (5 year), halka markii hore ay ka ahayd 3-4 sano. Jaamacadaha dalka ka jira sida Xamar iyo kuwa maamul goboleedka kale ayaa fuliyey go'aankaas, sida maamulka Puntland ee SSC Khaatumo deris yihiin, waxaana fulin nidaamka ka jira Soomaaliland. Jaamacadda aan fulin go'aanka mudada waxbarashada oo ka bilaamasa sanadka 2023-2024.


[3] Wasarada waxbarashad Hidaha iyo Tacliinta Sare ee Maamulka ssckh, Qoraalka ayaa la aabacay bishi September 8, 2024

5. Wasaaradda Waxbarashada iyo Arrimaha dibada JFS ayaan tasdiiqin doonin shahaadooyinka waxbarasho ee ka yar 5 sano: Waxaa jiray arday u hoggaansami waayey go'aankan oo Jamacaday dhiganayeen ay ka joojisay waxbarashdadii ka dib marka sameeyeen rabshad (Fiiri figure 4), sidaa darteed, waxaa muhiim lama huraan ah in wasaaradda Waxbarashada mamulka SSC Khaatumo ka shaqayso siday go'aankaa u dhaqan galin lahayd, haddii kale waxay saamayn togan ku yeelan doontaa ardayda, waayo ardaydu ma heli doonaan shahaado ay tastiiqisay Wasaaradda arimaha dibada iyo Waxbrashada federaalku, waxaa kaloo adkaan doonto in ay shaqo ku raadsadaan shahaadadan.

   ***F.G***: Fadlan lifaaqyada akhiriso (pageka ugu danbeeya qoraalkan)!

**4. Talo soojeedin:**

1. In wasaaraddu samayso qorshayaal la fulin karo iyo hagayaal caawinaya maamulka iyo masuuliyiinta bahda waxbarashada, sidoo kalena in ay wasaaraddu diyaariso koox khabiiro ku ah qorida mashaariicda iyo raadinta ha'yadaha caalamigaa ee ku shaqada leh arrimaha waxbarashada, si loo helo marshaariic wax ku ool ah.
2. In maamulka iyo shacabka SSC Khaatumo ay sii labo jibbaaraan arrimaha iskutashiga waxbarashada: Taasoo loomarayo inay wasaraddu la yeelato wadashaqayn dhow iyo kulamo joogto ah bahda waxbarashadda sida aqoon iswaydaarsi iyo in ay daraasad ku samayso hababka wacyiga iyo tayada waxbarashada kor looqu qaadi karo, heer Jaamacadeed iyo mid hoose.
3. In Wasaaraddu ay ka shaqayso hirgalinta go'aanka 5-ta sano ah ee waxbarashadda Jaamacadaha heer ka 1-aad (Bachelor's Degree) waliba sid degdeg ah, iyadoo kulamo iyo shirar la yeelanaysa masuuliyiinta Jaamacadaha, macallimiinta, ardayda iyo waalidiinta si loo abuuro jawi baraarug ah
4. Tayeynta macallimiinta iyo in ardaydu hesho shahaadada Federaalka sida ugu hufan oo ugu kharash yar. Tusaale in xafiiska bixinta shahoodooyinka laga bixiyo Laascaanood, iyo Buuhoodle, iyadoo tasdiiqsan si ardaygii rabo waxbarasho dibadaa uusan xamar ugu safrin.



OGEYSIIS

**Ujeeddo: Dibu'eegista Go'aankii Wasaaradda Waxbara-shada ee 2019**

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxa ay ku wargalinaysaa dhammaan cidda ay khuseyso:

1- In laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 07, Agoosto, 2024, la og-golaaday in la tasdiiqiyo shahaadada saddexda sanno ah, ee ardaydii ka qalinjabisay jaamacadaha dalka, sannad dugsiyeedkii 2023-2024, iyo wixii ka horreeyay.

2- In aanan marna la aqbali doonin shahaado saddex sanno ah, wixii ka danbeeyo sannad dugsiyeedka 2023-2024.

3- Dhammaan jaamacadaha dalka waxaa la farayaa in ay u hoggaansam-aan fulinta go'aankii Wasaaradda ee soo baxay Maarso, 2019, kaasoo ay ku caddahay inaan la aqoonsan doonin shahaado jaamacadeed oo ka yar 4 sanno, ilaa laga gaaro sannad Dugsiyeedka 2025/2026.

4- Sidoo kale, iyada oo laga duulayo go'aankii Wasaaradda ee soo baxay bishii Agoosto, 2023, kaasoo lagu soo kordhiyay sannadka aasaasiga ah (foundation year) ee jaamacadda, ee dhaqangalay Sannad dugsiyeedkii 2023/2024, ay Wasaaraddu u aqoonsanayso in heerka koowaad ee jaamacadda uu yahay ugu yaraan 5 sanno. Dufcada ugu horreysana waxa ay soo qalinjabinayaan 2027/2028.

Wasaaradda Waxbarashada,
Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

*Figure 2: Ogasiis hirgalinta go'aanka Wasaradda Waxbarashada Iyo Tacliinta Jamhuurada Federaalka Soomaaliya*

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة التربية والثقافة والتعليم العالي
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Education, Culture & Higher Education
Office of the Minister

**Tix: WWH&TS/XW/123/08/2023** **Agoosto 16, 2023**
**Ku: Guddoomiyaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed**
**Ku: Guddoomiyayaasha Jaamacadaha Gaarka Loo Leeyahay**
**Og: Maamulka gobolka Banadir**
**Og: Wasiirada Waxbarashada Dowlad-Goboleedyada**

**Ujeeddo: Sannadka Asaasiga ah ee Jaamacadaha (Foundation Year)**

Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare waxa ay u taagan tahay in muwaadinka Soomaaliyeed uu helo tacliin iyo xirfad tayo leh, oo la aqoonsan yahay, taas oo xallisa mushkiladaha ay wajahayaan jiilka dhallinyarada ah ee ku soo barbaaray duruufaha adag ee tacliinta, una diyaarinaysa in ay la qabsadaan horumarka caalamka, ayna ku heli karaan fursado shaqo oo dhisa noloshooda shakhsiga ah iyo tan bulshadeenna.

Waxaa sannad walba sii kordhaya tirada ardayda ee ka soo gudbaysa marxaladda Dugsiga Sare. Sannadkan waxaa soo gudbay ilaa konton kun oo arday. Sidaa oo kale waxaa sannadkan jaamacadaha dalka ka qalinjabiyay shan iyo labaatan kun oo arday ku dhawaad. Tiro ahaan ma badna marka loo eego da'da waxbarashda u baahan. Waxaase si weyn la isula arkay in ay jiraan caqabado dabraya habsami u socodka sooyaalka waxbarasho ee heer jaamacadeed, taas oo keenta in ardaygu sii wadi waayo waxbarashada, tayada tacliinta sare oo hoos u dhacda, iyo kummanaanka soo baxa oo xirfad iyo aqoon ahaan la falgeli waaya suuqa shaqada, amaba la qabsan waaya waxbarashada heerka labaad ee Jaamacadaha Adduunka.

Wasaaradda oo si dhow ugu kuurgashay xaaladda Tacliinta Sare ee dalka, sannad dugsiyeedkii tagay, tixgelinaysana soojeedintii shirweynaha qaran ee waxbarashada 13-17 Maarso 2023, waxa uu wasiirka wasaaradda soo saaray go'aannada soo socdo:

1. Laga billaabo sannad-dugsiyeedka 2023/2024, dhammaan ardayda doonaysa inay galaan tacliin jaamacadeed, waa in ay maraan hal sano oo waxbarasho asaasi ah (Foundation Year).
2. Sannadka waxbarashada asaasiga ah, waxa uu ka kooban yahay laba semester, oo aan ku jirin muddada afarta sano ama ka badan ee waxbarashada heerka koowaad ee jaamacadda.
3. Maaddooyinka lagu dhigayo Sannadka Waxbarashada ee asaasiga ah, waa in ay ka mid noqdaan: Afka Soomaaliga (oo ay ku jiraan suugaanta, dhaqanka iyo taariikhda), Afafka Carabiga iyo Ingiriiska (ama luqadda uu ardayga ku qaadan doono waxbarashadiisa jaamacadeed), Daraasaadka Islaamka (Fahamka guud iyo akhlaaqda Islaamka), Xirfadaha Habqoraalka Akadeemigga ah, Xirfadaha Xallinta khilaafaadka, Xiriirka Bulshada iyo Hab-fekerka Naqdineed (Critical Thinking)
4. Wasaaradda Waxbarashada oo kaashanaysa khubarada Jaamacadaha Soomaaliyeed, waxa ay gacan ka gaysanaysaa dhismaha saabka manhajka sannadka waxbarashada asaasiga ah ee heerka jaamacadeed.

Bahda Tacliinta Sare iyo dhammaan ardayda Soomaaliyeed waxa aan u rajaynaynaa sannad waxbarasho oo tayo leh.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Office of The Minister

**Mudane, Faarax Sheekh Cabdulqaadir**
**Wasiirka Wasaaradda**

Address: Jidka Afgooye, KM5, Hodan, Mogadishu – Somalia,
Email: minister@moe.gov.so

*Figure 3: dhaqangalinta Sanadka Aasasiga*



Go'aan

Jaamacada Benadir oo dhaqangalineyso go'aankii kasoo baxay Wasaarada Waxbarashada, Hidaha iyo Tacliinta sare, ee taariikhdiisu aheed **7 August 2024,** qodobka 2aad ee qeexaya **"In aanan marna la aqbali doonin shahaado saddex sanno ah, wixii ka danbeeyo sannad dugsiyeedka 2023-2024".**

Waxaa maanta oo taariikhdu tahay **9 December 2024** laga ceeriyay Jaamacadda Benadir liiska ardayd hoos ku xusan kadib markii ay ka hor imaadeen dhaqangalinta awaamirta Wasaarada iyo shuruucda Jaamacadda, ayagoo ku kacay falal liddi ku ah hambsami socodka waxbarashda Jaamacada Benadir.

Hadaba ardayda guud ahaan waxaa looga digaya in ay qeyb ka noqdaan falalka anshax xumo ee aan looga baran ardayga wanaagsan, waxaana la farayaa in ay waxbarashadooda wataan.

**Wabillahi Towfiiq**

*Figure 4: Go'aanka ardayda Jamacada looga cayriyey*

**Dhammaad!**